



Sida Loogu Gudbiyo Dukumintiga Codsigaaga 3SquaresVT



Macluumaad Dheeraad ah oo ku saabsan 3SquaresVT:

Booqo

www.vermontfoodhelp.com
ama wac **1-800-479-6151**

Si aad u hesho turjubaanka ku hadla luuqadda, wac **1-855-247-3092**

Waa inaad keentaa dukumiintiyada gaar ah si aad u heshid dheefaha 3SquaresVT.

- Waxaad ku dari kartaa dukumiinti dalabkaaga. U isticmaal liiska dhinaca kale ee xaashidan si aad u bilowdo.
- Wareysigaaga, takhasuslaha manfaciyada ayaa kuu sheegi doona dukumiintiyada aad u baahan tahay inaad soo dirto. Waxaad ku heli doontaa ogeysiis boostada kadib wareysigaaga oo aad la socoto macluumaad dheeraad ah iyo liiska dukumiintiyada loo baahan yahay. **Hubi inta badan warqaddaada si aanad u seegin ogeysiiskan muhiimka ah.**
- Waa inaad ku soo jawaabtaa ogeysiiskaas waqtiga loogu talagalay ama waxaa laga yaabaa in lagu diido dheefaha. Haddii ay kugu adag tahay helitaanka macluumaadka iyo dukumintiyada loo baahan yahay, booqo xafiiska degmadaada ku yaal ama wac **1-800-479-6151** si aad u hesho caawimaad. Garaac 2-1-1 si aad u hesho xafiiska degmadaada.

Nuqul ka samayso dhammaan dukumintiyadaada.

- Ha u dirin wixii asalka ah. Xafiisyo badan oo magaalada ah iyo maktabadaha dadweynaha ayaa leh koobiyeen sawir ah oo aad ku isticmaali karto bilaash ama lacag yar.
- Ku qor magacaaga iyo 4ta lambar ee ugu dambeeya lambarkaaga sooshal sekuur bog kasta oo aad dirto.

Keen nuqulo xafiiska degmada ee degmada ama boosto ugu dir:

DCF/Economic Services Division
Application and Document Processing Center
280 State Drive, Waterbury, VT 05671-1020

Oct 2021

Liiska Hubinta Dukumintiyada

Xusuusnow: Kilamara ulete au utume nakala za hati zako, sio asili. Unaweza kutengeneza nakala katika ofisi nyingi za mji na maktaba za umma. Andika jina lako na nambari nne za mwisho za nambari yako ya Usalama wa Jamii (SSN) kwenye kila ukurasa.

Waxaa lagu weydiin karaa inaad bixiso:

- Aqoonsiga (sida laysanka darawalnimada, shahaadooyinka dhalashada, kaararka caymiska caafimaadka) iyo lambarrada Sooshiyaal Sikiyuiritiga (SSN) ee loogu talagalay qof kasta oo doonaya dheefaha 3SquaresVT. Aqoonsi sawir looma baahna.
- Caddaynta dhammaan dakhliga la kasbaday ee la helay 30-kii maalmood ee la soo dhaafay (sida jeegagga mushaharka, warqad ka timid loo shaqeyahaaga, iwm.).
- Haddii aad iskaa u shaqeysato, foomamkaagii ugu dambeeyay ee canshuurta federaalka. Haddii ganacsigu cusub yahay ama haddii cashuur celintaadii ugu dambeysay aysan ka tarjumeyn heerarka dakhliga ee hadda jira, diiwaangeli buugaagta muujinaya dakhliga iyo kharashyada.
- Caddaynta dakhliga aan shaqaysan sida lacagta hawlgabka, dulsaarka, faa'iidooyinka ama masruufka carruurta. Uma baahnid inaad dirto dukumiintiyo ku saabsan lacagtaada Lambarka Bulshada hadii aan lagu weydiinin.
- Caddaynta maxkamad kasta oo amartay masruufka carruurta ee aad siiso qof kasta oo aan reerkaaga ka mid ahayn.

Dukumiinti dheeraad ah:

- Kharashyada caafimaadka jeebkoda ka baxsan. Haddii aad tahay 60 ama ka weyn tahay ama aad naafo tahay, waxaad u-qalmi kartaa dheefaha 3SquaresVT ka sarreeya haddii aad caddeyso inaad ugu yaraan \$ 35.01 ku bixiso kharashaadka caafimaadka bil kasta. Tan waxaa ka mid ah dhammaan kharashaadka caafimaad ee ka baxsan jeebka oo uu oggolaaday xirfadle daryeel caafimaad. Waxaad dalban kartaa khidmadaha Medicare, daawooyinka lagu qoro, daawooyinka aad iska iibsato, muraayadaha indhaha, daryeelka ilkaha, iyo waxyaabo kale oo badan. Haddii aad ku bixisid wax ka badan \$ 151 bishii kharashka caafimaadka, takhasuslaha faa'iidooyinka ayaa kuu sheegi doona dukumiintiyada dheeraadka ah ee loo baahan yahay si loo dalbado dhammaan kharashyadaada caafimaad. Caddayntu waxay noqon kartaa biil, qaansheegad, warqad ka socota dhaqtarkaaga, iwm.
- Ma waxaa lga yaabaa inaad u baahato inaad muujiso caddeynta qiimaha guryaha sida kirada, moorgeejka, ama canshuurta guryaha.
- Khabiiir ku takhasusay dheefaha ayaa kuu sheegi doona wixii dukumiinti dheeraad ah ee loo baahan yahay inta lagu guda jiro waaysugaaga. Waxaad sidoo kale wici kartaa **1-800-479-6151** hadii aad wax su'aalo ah ka qabtid dukumiintiyada.

Oct 2021